



KindyLinQ

Madadaalo, lacag la'aan ah, ciyaar loo dhan
yahay oo barta kulannada dhalashada - 3.5
caruurta jirta iyo qoysaskooda

KindyLinQ waa barnaamij ciyaar ku salaysan oo lacag
la'aan ah oo lagu bixiyo qaab koox-ciyaareed oo
qoysaska iyo carruurta ay ka qaybgeli karaan sannadaha
hore ee inta aysan gaarin inay bilaabaan kindergarten ka.

Barnaamijka waxaa hogaaminaya shaqaalaha
KindyLinQ wuxuuna bixiyaa goob aamin ah, lagu soo
dhaweeeyo qoysaska si ay ula joogaan carruurta si
wadajir ahna uga qayb qaataan waayo-aragnimada
barashada hore ee madadaalada leh.

Barnaamijku wuxuu socdaa xilliyyada ay iskuulaadku
furan yihiin. Ka qaybqaadashadu waa mid aad adigu
ikhtiyaar u leedahay qoysaskuna had iyo jeer waxay la
yimaadaan ilmahooda/carruurtooda. Maalmaha iyo
wakhtiyada barnaamijka waxay ku kala duwan yihiin
goobaha.

Kulanada KindyLinQ waxay ku salaysan yihiin
barnaamijyada iyo dhaqamada caddaymaha ku
salaysan, oo ay ku jирто Qaabdhismeedka Barashada
Sannadaha Hore.

Faa'iidooyinka ay ka helayaan carruurta iyo
qoysaska

Qoysasku waxay ciyaraan doorka ugu muhiimsan
ee aasaaska deegaanka ay carruurtu u baahan
yihiin inay ku kobcaan waxna ku bartaan. KindyLinQ
waxay qoysaska siisa hagitaan si ay u taageeraan
waxbarashada ilmahooda marka guriga la joogo.

Barnaamijku waxa uu taageeraa waxbarashada
carruurta, korriinka iyo ka-qaybgalka sanadaha hore
ka hore inta aanay bilaabin Kindergarten ka.

Nidaamka KindyLinQ ee aan rasmiga ahayn, ee
diirada lagu saarayo qoyska waxay ka caawinaysaa
qoysaska inay si fudud ula howlgalaan barayaasha
marka laga hadlayo goobaha waxbarashada.

Barnaamijku waxa uu abuuraa xiriir adag oo taageero
ah oo u dhexeyya guriga, dugsiga, adeegyada
carruurnimada hore iyo bulshada qoysaska.

Qaab wax loogu barayo ciyaarta

KindyLinQ waxay ku salaysan tahay qaab ah koox-
ciyaareed loo qorsheeyay.

KindyLinQ, carruurtu waxay wax ku bartaan waxqabad
dhab ah oo ku yimid waayo-aragnimada taageerada iyo
hagidda laga helayo qof weyn oo daryeelo ah. Carruurtu
waxay baran doonaan xirfado kaalmeynaya waqtii
xaadirka ah iyo waxbarashadooda dambe oo ay ku jirto
isdhiegalka, maaratay shucuurtooda iyo horumarinta
xirfadaha luqadda si loo hubiyo inay si wax ku ool ah
u gudbin karaan fikradahooda iyo baahidooda.

KindyLinQ waxa kale oo ay gacan ka geysataa inay
qoysaska ku xirto xanaanada la ansixiyey.

Ka eeg liistada goobaha bixiya KindyLinQ oo
dhameystiran **Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo**
Daryeelka website kooda oo booskaaga hada sii qabso.